www.bookbite.org.uk

Hagaha...samaynta kooxda akhriska

Ilaa 500,000 oo qofood ayaa dalka Ingiriiska ku jiro kooxo wax isla akhriyo. Waxaa ka qeyb qaato dad indhooleyaal ah, aabeyaal, dhallinyaro, da' iyo jinsi kala duwan. Kani wuxuu ku tusinaayaa sida fikradda u isticmaali karaan dad kala duwan si ay u dhax galaan ra'yigooda iyo waxyaabaha ay xiiseeyaan.

WAA MAXAY KOOXDA AKHRISKA?
Wuxuu ahaan karaa oo kaliya dhowr saxiibo ee ku kulmo maqaayad ama guri si ay uga hadlaan buug ama buugaag. Maktabadaha waxay xittaa yihiin meel fiican ee lagu barto iyo lagula kulmo dad badan waxayna qabaan nuqulo badan ee isla buugag si ujeeddaadaan loo qabto. Laakin waxaa xittaa kullamadaan lagu qabtaa dukaamaha buugaagta iibiya, isbitaalada, baarasha, kooxaha diimeed iyo sidoo kale shaqada. Qaar ka mid ah kooxaha waa kuwo caadi ah, kooxo kale waxay diiradda saaraan buugaag nooc gaar ah sida kuwa ku saabsan dembiyada, haweenka wax qoro, gabeyo ama buugaagta waqti horey la qorey.

WAA MAXAY SABABTA?
Ayadoo gaar ka ah faa'iidada bulshadeed ee kullanka iyo isla cabidda shaahi, waa iska caadi inaad jeclaan kartid inaad ka hadasho buug aad jeceshahay ama niyadda kuu dhisay. Kooxaha akhriska waxay dhiirri-geliyaan inaad ka fikirto buugga iyo dhegeysato ra'yi kala duwan. Badanaa waxay kuu furi karaan noocyo badan ee sheeko qorayaal ee weligaa aadan ka fikirin inaad akhriso.

SIDEE AYAAN U HELAA KOOX ANIGA II DHOW?
Haddii aad rabtid inaad ku biirto koox waxaa jiro habab kala duwan ee lagu ogaan karo meesha la tegi karo:

- Maktabaddaada deegaanka
- Bogag internet sida www.bookgroup.info, iyo www.readinggroups.peoplenetwork.gov.uk
- Ururyo mutaddaawiciin iyo kooxo xannaano.

Waxaa xittaa jiro kooxyo wax-akhris badan ee internetka laga helo ee maamulo majaladaha iyo ururyo kale sida 'book army' (www.bookarmy.com), shirkadaha buugaagta soo daabaca sida Penguin Books (http://readers.penguin.co.uk) iyo sidoo kale idaacadaha Telefishinka iyo Raadiyaha gaar ahaan Radio 4 (Open Book and Book Club) iyo TV Book Club (www.tvbookclub.co.uk).

SIDEE AYAAN MID U SAMEEYAA?
Sida aad u samayn doontid wuxuu ku xiran yahay wixii aad ka rabtid kooxdaada akhriska. Waxay ahaan karaan kuwo rasmi ah ama iska caadi ah, sida aad jeceshahayba. Weydii dhowr saxiibo ama dadka aad ku aragto kooxaha deegaanka kale ama naadiyaha si aad u ogaato haddii ay rabaan inay kooxdaada ku soo biiraan.
Waxaad u baahan tihiin oo kaliya inaad ku heshiisaan goobta aad ku kulmi doontaan (ma ahan in mar walba isla meeshii lagu kulmo), waqtiga iyo intii jeer aad rabtiin inaad kullantaan. Hal mar bishiiba waa habka ugu caansan.

SIDEE KU GO'AANSANAA WIXII AAN AKHRIN DOONNO?
Waxaa caadi ahaan bil walba kooxda lala xushtaa hal buug bishiiba, marba qof ayaa buug soo jeedin doono. Hase-yeshe, kooxo kale waxay jecel yihiin inay akhriyaan buugaag kala duwan kadibna kulmaan si ay uga hadlaan wixii ay akhriyeen iyo dhegeystaan xulashooyinka dadka kale ee kooxda. Adiga ayuu kugu xiran yahay laakin haddii aad rabtid inaad wada akhrisaan isla buug iyo kala

qeybsataan ra'yigiina waxaa jiro hab kala duwan ee aad fikrad ku heli kartaan:

- Xulo nooc buug sida kuwa goor horey la qorey, kuwa fasaxa la akhristo, sheeko gaaban ama buugaagta aad akhrisan jirteen marki aad dhallinyaro eheed
- Liiska sheekoyinka casriga ah ee maktabaddaada degaanka, dukaanka buugga ama liiska buugaagta ugu caansaan ee ku qoran wargeysyada ama internetka
- Ra'yi bixinta buugaagta ee lagu qoro wargeysyada iyo majallada
- Liiska gaaban ee buugaagta helay abaalmarinada Orange Prize ama Costa Prize ee badanaa lagu qoro warbaahinta.

Ma ahan inay ahaadaan buugaag. Waxaad ku bilaabi kartaa majallado ama qoraallo wargeys, sheekoyin gaaban ama wax internetka laga soo saarey.

MAXAAN KA HADALNAA?
Adiga ayuu dhab ahaan kugu xiran yahay. Waxaa suurtogal ah inaad rabtid inaad egto meesha ay sheekada u socoto. Si aad u bilowdo waxaa fiican inaad ka hadasho dareenka shucuureed uu buugga kugu dhaliyey, dadka buugga ku jiro iyo sida loo rumaysan karo, fariinta muhiimka ah ee sheekada, qeybaha aad si fudud u xasuusato iyo sababta iyo waxyaabaha ka fiican sheekada iyo kuwa xun.

MIYUU QAALI EHEEN IN BUUGAAG MAR WALBA LA IIBSADO?
Haddii aad hal buug isla waqtigii wada akhrinaysiin, qaali ayuu idinku noqon karaa. Taasi waa sababta ay kooxo badan u akhriyaan buugagta raqiiska ah waxaana fiican in la raadiyo sicir dhimista dukaamada buugaagta iyo internetka. Xittaa dhowr dukaamo ee waddooyinka wayn iyo internetka ku yaalo waxay baxshaan lacag-dhimis fiican markii hal buug ka badan laga iibsado. Weydii maktabaddaada buugga ay nuqulo badan ka qabaan iyo ka codso inay meel ku dhigaan.

Hab kale waa inaad ka hadashaan labo buug kullankiiba si aad biishiiba u kala beddelataan, sidaa labadii biloodba (ama waqtigaad doorataan) hal buug kaliya ayaad iibsan doontaa. Waxay noqon karaan kuwo isku qof qorey ama isla wax ka beddelataan iyo kullanka labaad is bar-bardhigtaan labada buug.

MIYEEY JIRAAN SHURUUDO GAAR AH EE LAGU MAAMULO KOOXDA AKHRISKA?
Wax walba ayaa laga qorey mawduucaan, waxaana ururyo iyo buugaag waxter leh lagu qorey hoos. Laakin wuxuu ku xiran yahay sida aad rabtid inaad u maamusho kooxdaada. Waxaa talo fiican ah inaad guddoomiye kooxda magacaabtaan sidii si fiican la isku nidaamiyo iyo loo bilaabo wada-hadalka.

Qaar ka mid ah kooxaha waxa loo maamula si adag, kuwo kalena waxay yihiin kuwo si furan looga hadli karo iyo lagu maadi karo. Qaar ka mid ah dadka waxay ku taliyaan in aad qorto waxyaabaha muhiimka ah si aad ugu soo laabato ama u xasuusato wixii la sheegay laakin ma ahan inaad sidaa sameyso haddii aadan rabin inaad ka hadasho isla buuggaas kullanka xiga.

Waxaa fiican in la xasuusto dhowr arrimo haseyeeshe, xasuuso inuu qof walba:
- tookadooda xushtaan wixii la akhrin doono,
- helo fursadda uu ra'yigiisa/ra'yigeeda ku sheego markii la wada-hadlaayo oo uu
- ogaado dareemka iyo xaaladaha ay ku jiraan dadka kale ee kooxda ka mid ah

BUUGAAGTA IYO URURYADA

The Reading Agency

National Literacy Trust

BBC Raw

Bookgroup.info

Reading Groups oo qorey Jenny Hatley, Sarah Turvey

The Reading Group oo qorey Liz Noble

The Reading Group Handbook oo qorey Rachel W Jacobsohn